**Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya**

# Wargayska Nagaariit ee Federaalka

Sanadka siddeed iyo labaatanaad tirsiga 5aad
Addis Ababa, Dir 5, 2014

Soo-saaris uu ilaaliye ka-yahay Golaha Wakiilada Shacabka ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya

**Tusmada**

**Tirsiga Bayaanka:** 1265/2014

Bayaan Aas-aaska Golaha Wadatashiga ee Waddan …. Bogga 13,879

## Tirsiga Bayaanka: 1265/2014

Bayaanka aasaasidda Golaha Wadahadalka ee Waddan

Maadaama ay Itoobiya ka-dhex-muuqdaan kala-duwanaansho weyn oo ka-jira arrimaha waddanka ee sida weyn aasaasiga u ah oo u dhexeeya hoggaamiyayaasha kala-duwan ee siyaasadeed iyo afkaareed iyo weliba qaybaha kala-duwan ee bulshada oo loo-baahanyahay in la-qabto masraxyo wadatashi oo heer waddan ah oo uu shacabku yeelanayo oo loo-fulinayo hab ka-qaybgelin leh oo kala-duwanaanshahan iyo Isfahan-la'aantan lagu-xallinayo;

Maadaama fulinta wadatashiyada heer waddan ee ka-qaybgelinta ee laga-yeelanayo arrimaha aasaasiga ah ee waddanka ay waxtar u leeyihiin dhisidda Isfahan wanaagsan oo dalka ku-saabsan; si tartiib-tartiib ahna u kobicnayaan is aaminaadda iyo dhaqanka wadashaqaynta, iyo dib-u-cusboonaysiinta aayaha wiiqmay ee bulsheed; loona baahanyahay in la-fidiyo nidaam sharciyeed oo lagu-dargargelinayo geeddi-socodka wadatashiga heer qaran;

Maadaama arrimaha keenaya oggolaanshaha iyo aaminidda wadatashiyada heer waddan ay ka-mid-yihiin kartida iyo dhexdhexaadnimada ay leedahay qaybta wadatashiyada salaxysa ee hoggaaminaysa; loona-baahday in la-aasaaso mac'had oggolaansho balaadhan haysta oo karti u leh in uu wadatashiyada heer waddan si dhexdhexaadnimo leh u hoggaamiyo una xidhiidhiyo;

Iyada oo la-cuskanayo qodobka 53(1) ee Distuurka Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya ayaa la-bayaamiyey sida hoos ku-qoran:

## Qaybta Koowaad

## Xeerarka Guud

### 1. <u>Ciwaan gaaban</u>

Bayaankan waxaa loogu-yeedhi karaa "Bayaanka Aas-aaska Golaha Wadatashiga Heer Waddan ee Itoobiya ee tirsigiisu yahay 1265/2014".

### 2. Qeexitaan

Haddii uusan ereygu ahayn mid macno kale la-siin karo, ereyada hoos ku-qoran ee bayaanka ku-dhex-jira waxay yeelanayaan macnaha meeshan lagu-muujiyey:

1. **"Golaha koomishiinka"** waxaa loola jeedaa gole ay ku-wada-jiraan dhammaan koomishineerada wadatashiga ee dalka.
2. **"Koomishiinar"** waxaa loola jeedaa koomishiinar uu af-hayeenku golaha wakiilada shacabka u soo-bandhigayo oo uu ka-dibna

golaha wakiilada shacabku magacaabayo taas oo waafaqsan qodobka 12aad ee bayaankan;

3. **“Wadatashiga heer waddan”** waxaa loola jeedaa wadahadallo uu koomishiinku salaxayo oo ay qaybo kala-duwan ka-fulinayaan federaalka iyo deegaanada oo ui mawduuciyadiisa u diyaarinayo hab bayaankan iyo tilmaanta uu koomishiinku soo-saarayo waafaqsan;
4. **“Deegaan”** waxaa loola jeedaa deegaan loo-aasaasay sida uu dhigayo 47aad ee distuurka dawladda jamhuuriyadda dimuqraadiga federaalka iyo weliba maamul-magaalooyinka Addis Ababa iyo Diridhabe;
5. **“Daadihiye”** waxaa looa jeedaa qof-kasta oo uu golaha koomishiinaradu meelaynayo si uu u hoggaamiyo masraxyada waddanka ee laga-fulinayo federaalka iyo deegaanada;
6. **“Qof”** waxaa loola jeedaa qof dabiici ah ama qayb sharciga lagu-siiyey xuquuqda qofnimo;
7. Xeer-kasta oo jinsiga labka lagu-sheego jinsiga dhaddigguna wuu ku-jira.

**3. <u>Mabaadiida wadatashiga waddanka</u>**

1. Mabaadiida hoggaaminaysa wadatashiga waddan iyo dhammaan hawlaha koomishiinka waa kuwa hoos ku-qoran:

   B. Ka-qaybqaadasho;

   T. Cadcaddaan;

   X. Aamminimo;

   Kh. Isu-dulqaadasho iyo is-xurmayn;

   D. Sababaysnaan;

R. Muhiimada tala-bixinada iyo munaasibnimada;

S. Xidhiidhiye cadaali ah;

Sh. Qotodheerida mawduucyada iyo munaasibnimadooda

Dh. Dimuqraadiyadda iyo Saraynta Sharciga

C. Danaha Qaran

G. Adeegsiga Cilmiga iyo Waxyaabaha Qadarainta Mudan ee Dhaqanka Dalka

2. Koomishiinku mabdaadii'da uu aaminsanyahay in loo-baahanyahay wuu ku-soo-darsan karaa.

# Qaybta Labaad

## Aasaasmidda Koomishinka, ujeeddadiisa, shaqadiisa iyo mas'uuliyadihiisa

**4. Aasaasmidda**

1. Koomishinka wadatashiga waddan ee Itoobiya (oo wixii imika ka-dambeeya "koomishin" loogu-yeedhi doono) ayaa bayaankan loogu-aasaasay si uu u noqdo qayb eex siyaasadeed xor ka ah, xor ka ah saamayn-kasta oo ka-timaadda qayb-kasta oo dawli ah ama qayb kale, oo leh shakhsiyad sharciyeed oo isku-filan oo iskeed u taagan.
2. Koomishinku wuxuu hoos-tagayaa golaha wakiilada shacabka.

**5. Xarunta Dhexe**

Saldhigga xarunta dhexe ee koomishinku waa magaalada Addis Ababa, hase-yeeshe, kolba sida loogu-baahdo ayuu deegaanada kale xafiisyo laamo ah ugu-yeelan karaa.

**6. Ujeeddada Koomishinka**

Koomiishinku wuxuu yeelanayaa ujeeddooyinka aasaasiga ah ee hoos ku-qoran:

1. Wuxuu soo saaraa sababaha xasaasiga ah ee keenay kala-duwanaanshaha ku-saabsan arrimaha aasaasiga ee waddan ee qaybaha kala-duwan ee bulshada u dhexeeya isagoo la-soo-baxayaa mawcuucyada laga-wadahadlayo, wuxuuna salaxayaa wadatashiga laga-yeelanayo;
2. Wadatashiyada waddanka ee la-qabanayo ayuu ka-dhigayaa kuwa ka-qaybgelin leh oo ay qayb dhexdhexaad ah hoggaaminayso, diiradda saaraya mawduuc si si sax ah u taabanaya sababaha is-fahan-la'aanta keenay, u hoggaansan hab-raac wax-qabad oo cad, iyo in ay noqdaan kuwa qorshe leh oo midho dhal ah;

3. Wuxuu fidiyaa nidaam suuragel ka-dhigaya in wadahadallada wadatashiyada waddan ee la-qaban doono ay noqdaan kuwa wanaajiya xidhiidhka ka-dhexeeya qaybaha kala-duwan ee bulshada, iyo dawladda iyo dadweynaha; laguna abuurayo nidaam cusub oo siyaasadeed loo-fuliyo hab wanaajin karaa xidhiidhka ka-dhexeeya qaybaha;
4. wuxuu bixiyaa taageero lagu-dhaqangelinayo tala-bixinta wadatashiyada ka-soo-baxay oo uu sidaasna suuragel laga-dhigo in heer waddan laga-dhiso nidaam dimuqraadiyadeed oo is-aaminaad ka-dhex-abuuraya muwaadiniinta, iyo weliba dawladda iyo shacabka;
5. wuxuu-kobciyaa dhaqan siyaasadeed oo suuragel ka-dhigaya in wadahadal lagu-xalliyo dhibaatooyinka gudaha ee muddada soo-socday loona abuuro jawi salaxaya dhismaha nidaam dimuqraadiyadeed;
6. wuxuu ka shaqeeyaa xaalad dhalisa nabadgalyo dhidibo adag ku taagan si loo helo nabadgalyo waarta; iyo
7. Dhigidda aasaas xooggan oo lagu-dhisayo dawladd keenaysa is-fahan waddan lehna oggolaansho xooggan;

**7. <u>Qaabka Koomishinka loo-abaabulayo</u>**

Koomishinku wuxuu yeelanayaa:

1. Golaha koomishinka;
2. Koomishineerka Guud;
3. Ku-Xigeenka Koomishinareedka Guud;
4. Xafiis;
5. Kolba sida loogu-baahdo guddiyo, iyo
6. Shaqaalaha loo-baahan-yahay

**8. Muddada shaqada ee Koomishinka**

1. Muddada uu Koomishinku shaqaynayo waa saddex (3) sano.
2. Haddii ay lagama-maarmaan noqoto, Golaha Wakiilada Shacabku wuxuu dheerayn karaa muddada shaqada ee Koomishinka.
3. Muddada shaqada ee Koomishinka waxaa laga-soo-tirinaya taariikhda koomishineerada Koomishinka loo-magacaabay qaab bayaanka waafaqsan.

**9. Shaqooyinka iyo mas'uuliyadaha Koomishinka**

Koomishinku wuxuu yeelanayaa shaqooyinka iyo mas'uuliyada hoos ku-qoran:

1. Wuxuu dhisaaa guddiyo iyo kooxo khuburo oo wadatashiyada salaxaya oo fulinaya, daarsado kala-duwan samayna oo tala-bixinno la-imanaya;
2. Wuxuu darsaaa geeddi-socodyada hadda ka-hor ay qabteen hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga-ahayn iyo natiijooyinkii ka-soo-baxay; wuxuuna ka-dhiganayaa gashi uu u isticmaali doono wadadahadal waddan ee xiga ee uu fulin doono;
3. Wuxuu soo saara Isaga oo adeegsanaya daraasad, wadahadallo shacab ama habab kale oo munaasib oo lagu xalinayo kala-duwanaanshaha arrimaha waddanka ku-saabsan ee u dhexeeya hoggaamiyayaasha kala-duwan ee siyaasadeed iyo afkaareed iyo weliba qaybaha bulshada;
4. Wuxuu Isaga oo ka-duulaya arrimaha uu ku-soo-saaray hababka ku-qoran qodob-hoosaadka (3-aad) ee qodobka diyaariyaa mawduucyada wadatashiga, waxaanu salaxaa sidii wadahadal looga-yeelan lahaa, wuxuu dardargaliyaa wadatashiyada iyo wadahadalada;
5. Wuxuu salaxaa kullamo kala-duwan oo wadatashi oo federaalka iyo heerarka deegaanada laga-fulinayo oo is-fahan waddan lagu-keeni

karo oo ay ka-qayb-qaadanayaan ka-qaybgalayaan dhammaan qaybaha dalka ka-socda oo matalaya qaybaha kala-duwan ee bulshada iyo dhinacyo kala-duwan;

6. Wuxuu Ka-qaybgalayaasha shirwaynaha waddan ee wadatashiga ka-qaybqaadanayo ku-soo-xulayaa shuruudo iyo hab-shaqayn cad; wuxuuna ka-qaybgaliyaa wadatashiyada; wuxuu soo-saarayaa tilmaan faah-faahsan oo arrintan ku-saabsan;

7. Wuxuu samaynayaa in wadahadallada ay hoggaamiyaan koomishineerada ama daadihiyayaasha uu Golaha Koomishinku magacaabayo;

8. Wuxuu hawlgalinayaa khuburo qormo ka-diyaarinaya wadatashiyada lagu-yeeshay geeddi-socodyada wadatashiga; isku-habaynaya oo dhisaya tala-bixinnada la-soo-jeediyey oo u soo-gudbinaya golaha koomishineerada;

9. Wuxuu soo-saarayaa oo uu dhaqangelinayaa xeer-hoosaadyo iyo tilmaamo ku-saabsan hab-shaqaynta gudaha ee xafiiska, soo-xulashada mawduucyada wadatashiga laga-yeelanayo, wuxuuna fidinayaa nidaam lagula-soo-baxayo qaybaha ka-qaybqaadanaya wadahadallada waddan, wuxuuna qabanayaa hawlo kale oo kuwan la-mid ah;

10. Wuxuu diyaarinayaa dukumeenti xambaarsan mawduucyada shirwaynaha wadatashiga ee waddan, geeddi-socodka wadatashiyada, tala-bixinada wadahadallada ka-soo-baxay tabta tala-bixinnadaasi lagu-dhaqangelin karo, wuxuuna dukumeentigaasi ugudbinayaa Golaha Wakiilada Shacabka, qaybta fulinta iyo qaybaha kale ee dawliga ah ee ay arrintu khusayso, wuxuuna u shaacinayaa shacabka;

11. Wuxuu Dawladda siiyaa taageerada loo-baahanyahay ee ka-caawinaysa in ay diyaariso qorshe cad oo la-tabaan karo oo ay ku-

dhaqangelin karto tala-bixinada ka-soo-baxay wadahadallada waddan;

12. Wuxuu fidinayaa niidam lagula-socon karo dhaqangelinta tala-bixinnada la-helay;

13. Wuxuu qabanaya hawlaha kale ee loo-baahanyahay ee uu ujeeddooyinkiisa ku-fulinayo.

## 10. Shirka Golaha Koomishinka

1. Golaha Koomishinku wuxuu yeelanayaa shir caadi ah oo xeer-hoosaadkiisa waafaqsan; hase-yeeshe, markasta oo uu Koomishineerka Guud ama markii konton hal lagu-daray (50+1) oo koomishineerada ka-tirsan ay codsi shir soo-jeediyaan, koomishinku shir degdeg ah ayuu yeelan karaa;
2. Haddii tiro dhan konton hal lagu-daray (50+1) oo koomishineerada ka-tirsan ay joogaan shirku wuu qabsoomayaa;
3. Go’aanka koomishinku wuxuu noqonayaa sida ay xubnaha golaha koomishinku ku-heshiinayaan; hase-yeeshe go’aanka la-isku-raaci-waayo, codka aqlabiyadda ee koomishineerada golaha koomishinka jooga ayaa go’aanka yeelanaya;
4. Marka uu koomishinku go’aan gaadhayo, haddii ay tirada codka ee dhinacyadu isle’ekaato, dhinaca uu guddoomiyuhu raaco ayaa guulaysanaya.
5. Iyada oo ay xeerarka qodobkani sidoodaas yihiin, golaha koomishinku wuxuu samaysan karaa tilmaanta nidaamka uu shirka u fushanayo.

## Qaybta Saddexaad

## Arrimo Ku-saabsan Koomishineerada

### 11. Arrin ku-saabsan koomishineerada

1. Koomishinku wuxuu yeelanayaa kow iyo toban (11) koomishineerro;
2. Koomishineerka Guud, Ku-Xigeenka Koomishineerka Guud, iyo Koomishineerada kale Golaha Wakiilada Shacabka ayaa magacaabaya;
3. Golaha Wakiilada Shacabku wuxuu go'aamka magacaabidda koomishineerada soo-saarayaa ka-dib marka uu xaqiijiyo in murashaxyada la-soo-hordhigay ay buuxinayaan shuruudaha lagu-muujiyey qodobka 13aad ee bayaankan.

### 12. Qaabka Koomishineerada Loo-magacaabayo

Koomishineerada waxaa loo-magacaabayaa sida hoos ku-qoran:

1. Xafiiska Af-hayeenka Golaha Wakiilada Shacabka shacabka, ururrada siyaasadda iyo ururrada rayadka ah ka-qabanaya shakhsiyaadka koomishineerka noqon kara ee ay farta ku-fiiqayaan;
2. Iyada oo la-raacayo shuruudaha ku-hoos ku-qoran qodobka 13aad ee bayaankan ayaa lala-soo-baxayaa ugu-yaraan afar iyo toban murashixiin oo koomishineer noqon karaa, ka-dibna inta-shacabka loo-shaaciyo ayaa af-hayeenka loo-gudbinayaa;
3. Liiska murashixiinta ee la-diyaarinayo waa in uu noqdo mid tixgelinaya jinsiga iyo tilmaamaha kale ee ka-tarjumaya badnida iyo kala-duwanaanshaha;
4. Af-hayeenka ayaa hoggaamiyayaasha axsaabta siyaasadeed ee tartamayaasha ah, ururrada rayadka iyo golaha mac'hadyada diimaha la-yeelanaya wadatashi ku-saabsan murashixiinta la-soo-gudbiyey;

5. Af-hayeenku ka-dib marka uu la yeesho wadatashiga qodob-hoosaadka 4aad ee qodobkan ayuu kolba sida loogu-baahdo murashixiinta la-soo-gudbiyey kala-soo-baxayaa koomishineerka guud, ku-xigeenka koomishineerka guud iyo koomishineer, si loo-magacaabana wuxuuna soo-hordhigayaa Golaha Wakiilada Shacabka.

**13. <u>Shuruudaha Koomishineernimada Loogu-qalmayo</u>**

Qof-kasta oo koomishineernimo lagu-magacaabayo waa in uu buuxiyo shuruudaha hoos ku-qoran:

1. Jinsiyaddiisu ay Itoobiyaan tahay;
2. Si siman ugu-adeegaya dhammaan diimaha, quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta Itoobiya;
3. Ka madaxbanaan Asxaabta Siyaasada;
4. Ka qaybqaadan kara isfahamka Wadanka;
5. Anshax wanaagsan iyo shakhsiyad wanaagsan leh;
6. Kalsoonida Shacabka haysta;
7. Qof aan fal-dambiyeed culus lagu-dacawayn oo xukun dambiilenimo lagu-riday;
8. Waa in uu leeyahay karti buuxda oo uu shaqada koomishinka sida habboon ugu-fulin karo;
9. Qof oggol in uu dhammaan waqtigiisa shaqada koomishinka u huro.

**14. <u>Mushaarka iyo Faa'iidooyinka Koomishineerada La-siinayo</u>**

Mushaarka iyo faa'iidooyinka koomishineerada waxaa loo-fulinayaa qaab waafaqsan sida loo-siiyo mas'uuliiyinta dawladda ee jagooyinka sarsare ku-magacaaban.

## 15. Xuquuqda iyo Waajibaadka Koomishineerada

1. Koomishineer-kasta wuxuu yeelanayaa xuquuqaha hoos ku-qoran:

   B. Haddii uusan Golaha Wakiilada Shacabku ka-xayuubin xuquuqdiisa ka-nabdoonaanta dacwadda ama aan isaga oo fal-dmabiyeed fulinaya aan gacanta lagu-dhigin, muddada uu koomishineernimada ku-adeegayo wuxuu leeyahay xuquuqda aan fal-dambiyeed loogu-dacwaynayn;

   T. In uu si xor ah ugaga qayb-qaato hawsha golaha koomishinka iyo in uu codeeyo;

   J. In uu helo oo uu arko dukumeentiyada iyo xogta kale ee waxtarka leh ee ay shaqadu u baahantahay;

   X. Kolba sida uu golaha koomishinku go'aaminayo in uu hawlaha guddi iyo shaqooyinka kale ka-qaybqaato.

2. Koomishineer-kasta wuxuu yeelanayaa waajibaadyada hoos ku-qoran:

   B. In uu si habboon u fuliyo hawsha iyo mas'uuliyadda koomishinka;

   C. In uu waqtigiisa oo dhan shaqada koomishinka u huro;

   D. In uu iska-ilaaliyo isku-dhaca danaha;

   E. In uu ilaaliyo sirta uu geeddi-socodka shaqada ku-ogaaday;

   Kh. In uu k-fogaado falka dhaawacaya dhexdhexaadnimada, sumcadda iyo sharafta koomishinka;

**Xaaladda Koomishineerada Xilka Loogaga-dajinayo**

1. Koomishineer-kasta xilka waa looga-qaadi karaa xaaladaha hoos ku-qoran:

   B. Haddii uu xanuun dartiis hawshiisa caadiga ah ku-fulin kariwaayo;

   T. Haddii lagu-arko karti-yari si cad u muuqata;

   J. Haddii lagu-arko anshax-xumo weyn;

   X. Haddii uu shaqadiisa ka-hadho toban maalmood oo isku-xiga iyada oo ayna jirin sabab ku-filan; ama

   Kh. Haddii la-xaqiijiyo jiritaanka shuruud ka-mid ah kuwa ku-hoos qoran qodobka 13[aad] ee bayaanka oo uusan koomishineerku buuxin xilli la-magacaabayey.

2. Koomishineerka waxaa qodob-hoosaaska 1[aad] ee qodobkan xilka looga-qaadayaa markii codsi ka-yimaadda cid-kasta oo caddayn haysa oo uu Af-hayeenka Golaha Wakiilada Shacabka mid la-qaadan karo u arko oo uu ka-dibna codsi u gudubiyo Golaha Wakiilada Shacabka ama uu fikirku ka-yimaaddo xildhibaano Golaha Wakiilada Shacabka oo ayna tiradoodu ka-yarayn saddex meelood hal meel ama codsi ka-yimaadda koomishineero ayna tiradoodu saddex ka-yarayn oo uu ka-dibna Golaha Wakiilada Shacabku go'aamiyo.

## 16. Iska-casilidda Xilka

Koomishineer-kasta oo doonaya in uu iskii xilka iskaga-casilo intuu laba bilood ka-hor digniin qormo u dhiibo golaha koomishineerada iyo Af-hayeenka Golaha Wakiilada Shacabka iyo xilka ka-dagi karaa.

**17. Xil Kale oo Dawladeed**

Koomishineerka sida lagu-muujiyey qodobka 16[aad] ee bayaanka ama sida ku-qoran qodobka 17[aad] iskii xilka ugaga dagaa muddo laba sano ah looma soo xulanayo xil kale oo dawladeed.

**18. Baddalidda Koomishineer**

1. Haddii uu koomishineer xilka ugaga dago sida ku-qoran qodobka 16[aad] iyo 17[aad] ee bayaankan ama uu geeriyoodo Golaha Wakiilada Shabacbka ayaa liiska murashixiinta ee Af-hayeenka loo-soo-diray ee aan la-dooran ee qodobka 12[aad] ee bayaankan lagu-muujiyey kala-soo-baxaya koomishineer baddal ah oo magacaabaya.
2. Qodob hoosaadka 1[aad] ee qodobkan oo sidiisaas ah, haddii uu qofka xilka laga-qaaday ama is-casilay ama geeriyooday uu yahay koomishineerka guud ama ku-xigeenka koomishineerka guud, Af-hayeenka Golaha Wakiilada Shacabka ayaa baddalkiisa kala-soo-baxaya koomishineerada la-magacaabay ama koomishineerada murashixiinta ee sugayaasha ah ka-dibna Golaha Wakiilada Shacabka u gudbinayo si loo-magacaabo.

## Qaybta Afraad

## Arrimo ku-saabsan golaha koomishinka, koomishineerka guud iyo xafiiska

**19. Golaha koomishinka**

Golaha koomishinku waa gole ay xubno ka-yihiin dhammaan koomishineeradu.

**20. Hawsha iyo awoodda golaha koomishinka**

Golaha koomishinku wuxuu yeelanayaa awoodda iyo hawlaha hoos ku-qoran:

1. Wxuu si dhamaystiran u baadhaa una go'aamiyaa Mawduucyada wadatashiga shacabka lagala-yeelanayo;
2. Wuxuu si dhamaystiran u diyaariyaa iskuguna duba ridaa islamarkaana u gudbiyaa waxyaabaha ka soo baxa wadahadalada lala yeesho shacabka Golaha Wakiilada shacabka iyo Golaha Wasiirada si loo ansaxiyo;
3. Wuxuu baadhaa islamarkaana ansaxiyaa Miisaaniyada Sanadka;
4. Wuxuu baadhaa islamarkaana ansaxiyaa Warbixinta guud ee Xafiiska;
5. Wuxuu aas-aasaaa guddiyada loo-baahanayahay;
6. Wuxuu go'aaminayaa in deegaamada laga-aasaaso xafiisyo laamo ah;
7. Wuxuu hubiyaa islamarkaana ansaxiyaa natiijada baadhitaanka hantidhawrka hantidhawrka ee lagu sameeyayo Xafiiska;
8. Haddii koomishineerka guud iyo ku-xigeenka koomishineerka guud ay xilli isku-mid ah ay toban maalmood oo isku-xiga shaqadooda ka-hadhaan, xubnihiisa ayuu ka-dhex-dooranayaa guddoomiye ku-meelgaadh ah;
9. Wuxuu ansixiyaa qaab-dhismeedka xafiiska lagu-abaabulayo;
10. Wuxuu ansixiyaa magacaabista madaxa xafiiska;
11. Wuxuu soo-saaraaa tilmaamaha loo-baahanyahay ee bayaanka lagu-dhaqangelinayo;
13. Wuxuu dajinayaa tilmaanta anshaxa ee koomishineerada
14. Wuxuu soo-saarayaa xeer-hoosaadka xafiiska

## 21. Hawsha iyo awoodda koomishineerka guud

Koomishineerka guud wuxuu yeelanayaa hawlaha iyo awoodaha hoos ku-qoran:

1. Wuxuu gudoomiyaa islamarkaana hogaamiyaa golaha koomishinka;
2. Wuxuu hoggaamiyaa hawlaha guud ee koomishinka;
3. Wuxuu soo-bandhigaaa mawduucyada lagaga-wadahadlayo shirka golaha koomishinka;
4. Wuxuu iskugiu yeedhaa shir deg-deg ah kolba sidii loogu baahdo;
5. Wuxuu dabagal ku-sameeyaa hawlaha guud ee xafiiska;
6. Wuxuu qaybaha kale la xidhiidhaa isagoo Komishinka matalaya;
7. Wuxuu warbixinta u gudbiyaa Golaka wakiilada Shacabka;
8. Wuxuu Golaha hordhigaa musharaxa Xafiiska si loo magacaabo;
9. Wuxuu habwaafaqsan sharciga shaqaalaha ugu shaqaaleeyaa una maamulaa shaqaalaha Komishinka;
10. Wuxuu Miisaaniyada la diyaariyaa Waaarada Maaliyada, wuxuuna ka ansaxiyaa Golaha Wakiilada Shacabka;
11. Wuxuu qabtaa hawlaha kale ee uu koomishinku u xilsaaro.

**22. <u>Hawsha iyo awoodda ku-xigeenka koomishineerka guud</u>**

Ku-xigeenka koomishineerka guud wuxuu yeelanayaa hawlaha iyo awoodaha hoos ku-qoran:

1. Marka uusan koomishineerka guud joogin intuu baddalkiisa galo ayuu shaqaynayaa;
2. Wuxuu qabanayaa hawlaha uu koomishineerka guud u dhiibayo.

**23. <u>Arrimo ku-saabsan xafiiska koomishinka</u>**

1. Qof aan koomishineer ahayn ayaa xafiiska hoggaaminaya.
2. Xafiisku wuxuu yeelanayaa shaqaalaha kale ee loo-baahanyahay.
3. Xafiisku wuxuu hoos tagayaa koomishineerka guud.

## 24. Hawsha iyo mas'uuliyadda xafiiska koomishinka

Xafiiska koomishinku wuxuu yeelanayaa hawlaha iyo awoodaha hoos ku-qoran:

1. Inta uu diyaariyo qaabka xafiiska koomishinka loo-abaabulayo ayuu golaha koomishinka u gudbinayaa si loo-ansixiyo;
2. Adeegga maamuleed iyo kan maaliyadeed ayuu koomishinka siinayaa;
3. Wuxuu keenayaa gashiyada iyo adeegyada kale ee hawsha iyo mas'uuliyadda koomishinku u baahanyihiin;
4. Qormooyinka shirarka, go'aanada, diiwaanada xisaabaadka iyo xogta ayuu sida habboon u habaynayaa oo uu qabanayaa;
5. Koomishineerka guud ayuu ka-caawinayaa diyaarinta miisaaniyadda koomishinka, iyo
6. Wuxuu qabanayaa hawlaha kale ee ay golaha iyo koomishineerka guud ee koomishinku u qabanayaa.

## 25. Hawsha iyo mas'uuliyadda maxada xafiiska

1. Madaxa xafiisku wuxuu yeelanayaa hawlaha iyo awoodaha hoos ku-qoran:

   B. Intuu diyaariyo qaab-dhismeedka xafiiska lagu-abaabulayo ayuu golaha koomishinka u gudbinayo si loo-ansixiyo;

   T. Koomishineerka guud iyo golaha koomishineerada ayuu u gudbinayaa warbixinta waxqabadka xafiiska;

   J. Intuu qorsha-hawleedka xafiiska diyaariyo ayuu golaha koomishinka u diyaarinayaa si loo-ansixiyo;

   K. Wuxuu hoggaaminayaa maamulayaana hawlaha iyo awoodaha uu bayaanku xafiiska siiyey

2. Madaxa xafiisku wuxuu hoos tagayaa koomishineerka guud ee koomishinka.

## Qaybta Shanaad

## Xeerar kala-duwan

### 26. Isha miisaaniyadda

1. Miisaaniyadda koomishinka dawladda ayaa qoondaynaysa.
2. Xeerka ku-hoos qoran qodob-hoosaadka 1aad ee bayaankan oo sidiisaas ah, koomishinku wuxuu ka-heli karaa ilaha kale ee sharciyeysan.
3. Koomishinku isaga oo raacaya mabda'yada maamulidda miisaaniyadda dawladda ayaa xoriyad buuxda u leh in uu qaab xeer hoosaadkiisa waafaqsan uu miisaaniyaddiisa u maamulo.

### 27. Diiwaanada xisaabaadka

1. Koomishinku wuxuu haysanaya diiwaano xisaabeed oo dhammaystiran oo sax ah.
2. Diiwaanada xisaabaadka iyo dukumeentiyada lacagaha la-xidhiidha ee koomishinka waxaa sanad-welba baadhitaan ku-samaynaya hanti-dhawrka guud ama hanti-dhawrayaal uu isagu magacaabay.

### 28. Awoodda soo-saarista xeer iyo tilmaamo

1. Golaha Wakiilada Shacabku wuxuu soo-saari karaa xeer ku-saabsan xaaladda anshaxa ee koomishineerada, shaqaalaha koomishinka, daadihiyayaasha wadahadalada iyo qaybaha ka-qaybqaadanaya geeddi-socodka wadahadalka.
2. Golaha koomishineeradu wuxuu soo-saari karaa tilmaamaha loo-baahanyahay ee lagu-dhaqangelinayo xeerarka lagu-soo-saarayo hab bayaankan ama qodob-hoosaadka 1aad ee qodobkan waafaqsan.

**29. Arrimo ku-saabsan dukumeentiyada koomishinka**

1. Marka xilliga shaqada ee koomishinku dhammaado, waxay koomishinka mas'uuliyadi ka-saarantahay in dukumeentiyada la-diyaariyey xilligii ay wadatashiyada heer waddan socodeen, qormooyinka shirarka laga-diyaariyey iyo dukumeentiyada kale ee la-midka ah ku-wareejiyo Golaha Wakiilada Shacabka iyo adeegga dukumeentiyada iyo buugaagta ee Itoobiya.
2. Adeegga kaydka dukumeentiyada iyo buugaagta ee Itoobiya waxay mas'uuliyadi ka-saarantahay in dukumeentiyada uu koomishinka ka-guddoomayey uu sida habboon u habeeyo oo uu dhigo iyo in uu salaxo xaalad ay dadka doonaya in ujeeddooyin kala-duwan dukumeentiyada u eegaan ugagana faa'iidaystaan.

**30. Ku-khasbanaanta la-shaqaynta**

Qof-kasta wuxuu ku-khasbanyahay in uu koomishinka gacan ka-siiyo codsi-kasta oo sharciyeysan oo ka-caawinaya hawlgalka uu ugu-jiro gudashada mas'uuliyadda uu bayaankani saaray.

**31. Shuruucda aan dhaqangelka noqonayn**

Shuruuc-kasta oo bayaankan ka-soo-horjeeda, arrimaha uu bayaankani ka-hadlayo dhaqangel kama-noqonayaan.

**32. Xilliga uu bayaankan dhaqangelka noqonayo**

Bayaanka wuxuu dhaqangel noqonayaa marka laga-bilaabo Taahisaas 20, 2014 oo ah taariikhda uu Golaha Wakiilada Shacabku ansixiyey.

**Addis Ababa, Dir 5, 2014**

**Saahile Wariq Sawdhee**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya**